Somali Public Agenda

Faallo Kooban 06

Qiimaha dhulka Muqdisho iyo saameynta uu ku leeyahay dadka saboolka ah iyo barakacayaasha

Nofeembar 2019

Soo koobid

Muqdisho waa caasimadda dalka Soomaaliya, waana magaalada labaad ee ugu cufnaanta badan magaalooyinka caalamka, iyadoo ay ku nool yihiin dad ka badan labo malyan. Qiimaha dhulka ku yaalla Muqdisho waa kan ugu qaalisan Soomaaliya. Goobta uu ku yaallo, amniga, maalgashiga, dhismaha jidadka iyo helitaanka adeegyada aasaasiga ah ayaa go'aamiya qiimaha dhulka ku yaalla magaalada. Bangiyo ganacsi, milkileyaasha guriyaha, dallaallada, iyo barakacayaasha ayaa sidoo kale ka qeyb qaata, kaalin kala duwanna ku leh, sare-u-kaca qiimaha dhulka. Kaalinta dowladda ayaa xaddidan, sare-u-kaca qiimaha dhulkana waxaa ka dhashay barabixin. Qoysaska saboolka ah awood uma laha in ay ku noolaadaan goobaha qiimaha guryaha ku yaalla qaaliyoobeen, guri ka saaridda dadka barakacayaasha ahna way sii korortey. Faalladaan kooban waxaa ay ka hadleysaa sababaha iyo waxyaabaha ka qeyb qaatey sare-u-kaca qiimaha dhulka Muqdisho iyo saameysta uu ku leedahay dadka nugul. Faalladu waxaa ay kusoo gunaanadeysaa talooyin tixgelin mudan.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2019 Somali Public Agenda

Hordhac

Inkastoo sanado badan oo dagaalo iyo rabshado ah ay soo mareen Muqdisho, hadane magaalada waxaa ay leedahay cufnaanta labaad magaalooyinka caalamka marka lagasoo tago magaalada Dhaka oo ah caasimadda Bangaladesh (Demographia ,2019). Kororka tirada dadka ku nool magaalada waxa ay ka dhalatay xasiloonida ay heshay magaalada kadib markii ay al-Shabaab ka baxeen bishii Agoosto 2011 qaybo kamid ah magaalada oo ay gacanta ku hayeen, iyo sidoo kale rajada maalgashiga dhaqaale ee Muqdisho oo soo hagaagtay.

Nabadgelyada magaalada oo soo hagaageysey ayaa dhiirrigelisay soo laabashada qurbejoog badan, sidoo kale ganacsiyo cusub ayaa laga yegleelay qeybo badan oo magaalada ah. Tan iyo sanadkii 2012-kii, wadooyin muhiim ah ayaa la dhisey. Dad badan oo dib usoo laabtey ayaa dib-u-sheegtey dhulalkoodii iyo hantidoodii ay ka carareen markii dagaalka sokeeye uu ka qarxey Muqdisho, dowladdana la ridey bishii Janaayo ee sanadkii 1991-dii. Dib-u-dhiska cusub iyo maalgashiga, xaaladda amni oo soo hagaagtey iyo tirada badan oo dadka soo laabtey ayaa ka qeyb qaatey sare-u-kaca qiimaha dhulka Muqdisho.

Saboolka iyo barakacayaasha ku nool bartamaha magaalada ayaa la kulmey culeysyo maadaama ay qiimaha kiradu korortay. Qaar kamid ah dhismooyinkii hore iyo kuwii burbursanaa ayaa dib loo dhisey, waxaana laga kireeyey qoysaska dabaqada dhexe iyo ganacsato. Sidoo kale, ka saaridda barakacayaasha ee dhismayaasha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ayaa sii laba jibbaarantey sanadihii lasoo dhaafey (Internal Displacement Monitoring Centre, 2018). Xaaladdan ayaa ku khaasabtey in dadka barakacayaasha ah ay hooy ka raadsadaan dhismayaasha cusub ee ku yaalla ama u dhow wadada isku xerta Muqdisho iyo Afgooye.

Faalladaan koobaan waxaa ay qiimeyn ku sameyneysaa heerarka qiimaha dhulka, waxyaabaha ka qeyb qaadanaayo iyo saameynta uu ku leedahay qeybaha kala duwan ee bulshada ku nool Muqdisho. Somali Public Agenda ayaa ka sameysey cilmibaaristan Muqdisho intii u dhexeysey bishii Janaayo 2019 ilaa May 2019. Wadarta 21 wareysi ayaa lala yeeshey dad si toos ah ula xiriira arrimaha dhulalka Muqdisho oo ay kamid yihiin milkiilayaasha dhulalka, dallaallada dhulalka, shirkadaha ka ganacsada dhismaha iyo kireynta dhulalka, ganacsatada dhulalka, kireystayaasha, nootaayooyinka, dadka saboolka ah ee magaalada ku nool iyo barakacayaasha.

Qiimaha dhulka ee Muqdisho

Dhulka Muqdisho iyo naxaawigeeda waa labo nooc. Dhul dhisan iyo mid aan dhisneyn oo bannaan. Dhulka dhisan badanaa waxaa kireeya dadka iska leh. Qiimaha dhulka noocaan ah waa mid sarreeya marka la barbardhigo qiimaha lagu iibiyo dhulka bannaan ee aan dhisneyn. Hayeeshee, dhulka dhisan waa labo nooc. Nooca koowaad waa dhul leh ama ay ku dhisan yihiin dhismayaal hore oo si sahlan u dumi kara. Nooca labaad waa nooca dhulka naqshaddiisu cusub tahay dhowaanna la dhisey. Nooca dambe ayaa aad u qaalisan kiro ahaan iyo iib ahaanba markii la barbardhigo dhulka ay ka dhisan yihiin dhismayaal hore.

Kirada guryaha ee bartamaha magaalada ayaa sare u kacday sannadihii lasoo dhaafay. Lacagta kirada billaha ah ee guryaha ka kooban saddex illaa shan qol waxay u dhaxaysaa 350 doolar iyo 600 doolar, waxana ay ku xiran yahay qoobta uu ku yaallo guriga. Waxaa la rumeysan yahay in dhowr degmo oo Muqdisho ku yaalla sida Hodan, Wadajir, Waaberi, Howlwadaag, Xamar Jajab, Xamarweyne, iyo Warta Nabadda ay kamid yihiin meelaha ugu qaalisan ee la dego. Tani waxaa sababay goobta istiraatiijiga ah oo ay kaga yaallaan magaalada iyo u dhowaanshaha adeegyada aasaasiga ah – xarumo badan oo dowladeed ayaa ku shaqeeya inta badan degmooyinkaan.

Qaybo ka mid ah bulshada ayaa deggan degmooyinka qiimaha kirada iyo iibka guryaha ku yaalla uu sarreeyo. Kireystayaasha xaafadaha qaaliga ah waxa ay u badan yihiin labo qaybood: kuwo u welwelsan nabadgelyadooda iyo shaqadooda. Inta badan dadka deggan degmooyinkan waa shaqaale dawladeed ama shaqaale hay'ado caalami ah iyo kuwo maxalli ah, iyo sidoo kale ganacsato. Dad badan oo qurbejoog ah ayaa sidoo kale ku nool guryaha degmooyinkan ku yaalla.

Waxyaabaha go'aaminaya qiimaha dhulka

Dhowr waxyaabood ayaa go'aamiya qiimaha dhulka Muqdisho. Waxaa kamid ah goobta, maalgashiga, iyo helitaanka adeegyada aasaasiga ah, iyo kuwo kale.

Goobta: mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee go'aamiya qiimaha dhulka Muqdisho waa goobta uu ku yaallo. Hadba inta dhulka uu u dhow yahay bartamaha magaalada ayuu qiimihiisa ka qaalisan yahay dhulka kale. Sidoo kale, hadba inta uu dhulku ka fog yahay wadooyinka waaweyn ee bartamaha magaalada, ayuu qiimihiisana kasii hooseeyaa kuwa kale. Dhulka ku yaalla duleedka magaalada Muqdisho, markasta ee uu dhulku u dhawaado wadooyinka waaweyn iyo goobaha la deggan yahay, qiimahoodu sare ayuu u kacaa.

Goobta uu dhulka ku yaallo waxay xiriir toos ah la leedahay amniga. Tusaale ahaan, xaafadda Xamar Jadiid waxay leedahay waddooyin wanaagsan iyo qorshe magaaleyn wanaagsan, laakiin xaaladdeeda amni uma ahan mid lagu kalsoonaan karo dad badan, gaar ahaan masuuliyiinta dowladda. Sidaas darteed, qiimaha dhulka xaafadda Hamar Jadiid waxaa uu ka jaban yahay qiimaha dhulka ee xaafadaha kale sida Taleex. Tusaale ahaan, dhulka ku hareereysan Wadada Maka-al mukarama waxay kamid yihiin dhulka ugu qaalisan magaalada Muqdisho sababta ugu weyn ayaana ah nabadgelyada.

Goobta uu dhuku ku yaallo ayaa sidoo kale go'aamisa helitaanka adeegyada iyo tasiilaadka aasaasiga ah. U dhawaanshaha ganacsiga iyo adeegyada aasaasiga ah ayaa kordhiya ama hoos u dhiga qiimaha dhulka. Sabab kale oo muujineysa in dhulka u dhaw bartamaha magaalada uu qiimo sare leeyahay ayaa ah in ganacsiyada iyo adeegyada kale ee bulshada ay u dhawyihiin goobahan. Tani waa sababta dadka saboolka ah iyo barakacayaasha ay ugu guurayaan dhulka ka baxsan bartamaha magaalada maadaama qiimaha iibsiga iyo kirada dhulka ku yaalla duleedka magaalada ay ka hooseeyaan qiimaha dhulka bartamaha magaalada ku yaala.

Amniga: xaalada amni ee magaalada ka jirta uma oggolaaneyso qofkasta inuu dego meelkasta uu jecelyahay. Kuwa dhaqaalahoodu sarreeyo waxa ay door bidaan inay degaan xaafadaha u dhaw goobahooda shaqada ama xaafado amni ah oo ku yaalla magaalada. Tani waxay horseedday degmooyinka qaar sare-u-kaca qiimaha dhulku inuu gaaro meel sare oo aan hore loo arag. Sidaas darteed, dad badan oo sabool ahaa oo magaalada ku noolaa ayaa ku khasbanaadey inay degaan dhul ku yaalla daafaha magaalada, halkaasoo qiimaha kirada ay awoodi karaan.

Madaxa nootaayo ayaa sharraxaad ka bixiyay xiriirka ka dhexeeya qiimaha dhulka iyo nabadgelyada: "sheyga ugu muhiimsan ee la xusi karo waa amniga. Waxaa jiray wakhti dhulka ku yaalla Suuqa Xoolaha ee degmada Huriwaa iyo Cali Kamiin ee degmada Yaaqshiid ay ka qiimo badnaayeen degmooyinka ku yaalla bartamaha magaalada." Sababta ugu weyn ee kororka qiimaha dhulka Suuqa Xoolaha iyo Cali Kamiin wakhtigaas ayaa ahayd in xaafadahaasi ahaayeen meelaha ugu nabdoon magaalada Muqdisho.

Si kastaba ha noqotee, xaaladda nabadgelyada ayaa isbeddeshay wixii ka dambeeyay bishii Agoosto 2011 markii ay al-Shabaab ka baxeen Muqdisho. Xaaladda nabadgelyo ee degmooyinkii hore – sida Warta Nabadda, Howlwadaag, Hodan, Boondheere, iyo Cabdi casiis –, oo ay ka dhici jireen dagaallo joogto ah oo u dhexeeyey al-Shabaab iyo ciidamada dowladda, ayaa si weyn usoo hagaagay sidaas darteedna qiimaha dhulka ee degmooyinkaasi ayaa u kordhay si xowli ah.

Xaaladda nabadgelyada ee soo hagaagtay ayaa soo jiidatay qurbejoog badan oo bilaabay inay dalka kusoo laabtaan, dayactiraan dhismooyinkoodii hore, kuna kireeyaan qiimo sare ama abuuraan ganacsiyo cusub. Xaaladdan waxay ku khasabtay kireystayaashii inay raadiyaan guryo kale oo ku yaalla duleedka magaalada oo lagu kireynayo qiime ay awoodi karaan.

Howlwadeennada dowladda – shaqaalaha rayidka ah, siyaasiyiinta, iyo ciidamada amniga – waxaa mudnaanta koowaad u ah in ay degaan xaafad amni ah maadaama ay bartilmaameedsan karaan al-Shabaab. Tani waxa ay sababtey in dadku ay ku bataan xaafadaha qaar sida: Hodan, Waaberi, Hawlwadaag, Hamar Weyne, Warta Nabadda, and Wadajir.

Kaabayaasha wadooyinka: kaabayaasha muuqda sida wadooyinka ayaa gacan ka geysanaaya kororka qiimaha dhulka ee Muqdisho. Dhulka ku yaalla xaafad ayaa qiimihiisa sare u kacaa marka wado la dayactiro ama dadku ay ogaadaan in wado laga dhisi rabo sababtoo ah dadku waxa ay fahmsan yihiin in marka jidad la dhiso ama dib-loo-dhiso, ganacsiga iyo gaadiidka uu sahal noqon doono, qiimaha dhulkana uu kordhi doono. Sanadihii lasoo dhaafay, wadooyin badan oo laami ah ayaa laga dhisay magaalada Muqdisho. Qaar kamid ah waddooyinkaas waxaa maalgeliyey ganacsatada si loo kordhiyo qiimaha dhulka ka ag-dhow xaafadda. Sidaas darteed, kaabayaasha wadooyinku waa mid kamid ah waxyaabaha go'aamiya qiimaha dhulka ee magaalada.

Qiimaha xaafadaha qaar waxaa go'aamiya xaalado is-biirsaday sida goobta uu ku yaallo, amniga, iyo wadooyinka. Tusaale ahaan, xaafada Taleex ee degmada Hodan ayaa kamid ah xaafadaha ugu qaalisan Muqdisho. Sida uu sheegay dallaal dhul, tani waxaa u sabab ah dhowr arrimood. Marka koowaad, milkileyaasha boosaska ku yaalla Taleex waxay qiimo sare ku helaan kirada iyo iibinta dhulkooda sababtoo ah goobta ay ku yaallaan ee bartamaha magaalada iyo u dhowaanshaha adeegyada muhiimka ah. Tan labaad, Taleex waa xaafad amnigeedu fiican yahay. Midda saddexaad, waxay u dhow-dahay wadada weyn ee Maka-almukarama, jidadka xaafaddana waa kuwo waaweyn marka la barbar dhigo wadooyinka degmooyinka kale qaarkood sida degmada Waaberi.

Saameynta qabiilka: dadku iyaga ayaa go'aansada meelaha ay ka kiraysanayaan ama ka iibsanayaan guryaha. Dadka qaar ayaa jecel in ay gataan ama dageen xaafad ama degmo ay ku badan yihiin qabiilkooda. Tani waxaa sabab u ah kalsoonida yar ee u dhexeysa beelaha, taa oo lafteeda ka dhalatay sanado badan oo dagaallo qabiil ka dhacayeen magaalada Muqdisho iyo Soomaaliya. Kirayste dhul ayaa sheegay in qiimaha dhulka ku yaalla xaafad ay beel gaar ah ku badan tahay uu hooseeyo marka la barbar dhigo xaafadaha ay deggan yihiin beelo kala duwan. Wuu sharraxay: "Qiimaha dhulka ee degmooyinka ay beelo gaar ah ku badan yihiin wuu hooseeyaa sababtoo ah hal qabiil ayaa ku badan, laakiin xaafadaha ay ka jirto is-dhexgalka beelaha, qiimaha dhulka wuu sarreeyaa." Qiimaha dhulka ee xaafadaha ay beelaha qaar ku xooggan yihiin ee magaalada Muqdishu oo hooseeya ayaa ka dhalatay dalabka iibsiga ama kireysiga dhulka xaafaddaas oo yar. Dalabka iibsashada, maalgashiga ama kireynta xaafadaha noocan ah waxa uu inta badan ka yimaadaa dad ku abtirsada beesha ku xooggan xaafaddaas. Dalabka beelaha kale oo yar waxay horseedeysaa hoos-u-dhac ku yimaada qiimaha dhulka xaafaddaas.

Arrinta qabiilka waxay sidoo kale xiriir la leedahay fiditaanka magaalada. Waxaa la rumeysan yahay in qaar kamid ah xaafadaha ay ku badan yihiin beelaha in ay ku yar tahay magaaleynta qiimahooduna wuu hooseeyaa maadaama dadka deggan aysan xiiseyneynin soo-dhoweynta dad kale oo u dhashay beelo kale. Tani waxay ka muuqataa goobaha ay Muqdisho ku fidayso. Goobaha ay ku nool yihiin beelo kala duwan ayaa si deg deg ah u magaaloobaya.

Qurbejoogta: tan iyo sanadkii 2012, qurbejoog badan ayaa kusoo laabatay Muqdisho, qaar badan oo kamid ahna waxay maalgashadeen ganacsiyo waxa ayna kireysteen guryo. Qurbejoogta waxa ay inta badan degaan xaafado ammaan ah iyo xaafadaha dadku badani degan yahay. Tani waxay gacan ka geysatay kororka qiimaha dhulka iyo sidoo kale qiimaha kirada xaafadaha qaarkood. Milkiile guri ayaa sharraxay: "Qurbejoogtu waxay markii hore degi jireen hoteellada, laakiin markii dambe waxay bilaabeen inay xaafadaha kireystaan oo ay siiyaan milkiilayaasha guryaha lacag kiro fican taasoo markale keentay in uu sare-u-koco sicirki kirada guryaha". Milkiilayaasha guryaha ayaa dad badan oo sabool ah ka baxiyay guryihii ay kirada ku degganaayeen, dayactiray, kadibna lacag badan uga kireeyay qurbejoogta so laabatay. Hase yeeshee,

xaaladdan waxay jirtay xilliyada qaar, sidoo kalena tirada qurbejoogta soo laabasaneysay ma ahayn mid iskumid ah, waxaana saameyn ku leh xasiloonida siyaasadeed iyo fursadaha maalgashi ee kajira magaalada.

Adeegyada aasaasiga ah: Sida uu sheegay dallaal dhul oo la wareystay, dhulka ku yaal daafaha magaalada waxaa laga yaabaa inuu qiimihiisa kordho haddii loo dhiso wadooyin, iskuullo, jaamacado, isbitaallo, iyo masaajid, ceelal biyana loo qodo. Haddii helitaanka adeegyada bulshada la hagaajiyo, qiimaha dhulka ku yaalla duleedka magaalada wuu kordhaya. Tani waxay tilmaan u tahay in kuwa iska leh ama deggan dhulka ay si ula kac ah u kordhin karaan qiimaha dhulka ee xaafad gaar ah iyagoo xaafadda geynaya adeegyada aasaasiga ah.

Dhinacyada saameynta ku leh

Shakhsiyaad iyo hay'ado ayaa saameyn ku leh qiimaha dhulka ee Muqdisho. Kuwaas waxaa ka mid ah iibiyeyaasha dhulka, dallaallada, milkiileyaasha '*goofafka*', barakacayaasha, iyo bangiyada.

Barakacayaasha iyo milkiilayaasha *goofaf*-ka waxa ay gacan ka geysta kororka qiimaha dhulka. Qaar ka mid ah milkiilayaasha *goofaf*-ka – oo ah dhul aan diiwaangashanayn ee ku yaalla daafaha magaalada oo ay u adeegsadaan reeraha iyo reer guuraaga daaqa – waxa ay u oggolaadaan ama mararka qaar raadiyaan barakacayaal si ay u degaan *goof*-kooda. Barakacayaasha kasoo cararay colaado iyo abaaro ayaa dega dhulka *goof*-ka ah iyagoo aan bixin wax lacag ah, ujeedku mana naxariis iyo garab-istaag, balse waa in la deegaameeyo aagga si loosoo jiito indhaha dadka iibsada dhulka. Barakacayaashu sidoo kale waxay gargaarka bini'aadminimo la qeybsada milkilaha ama milkilayaasha *goof*-ka (Bakonyi, et al., 2019). Tani waxay ka dhacday deegaanno badan oo ka tirsan Weydoow iyo Tabeelaha oo ku yaalla duleedka galbeed ee Muqdisho. Markii xaafadda la deegaameeyo, qiimaha dhulka ayaa kordha, barakacayaashana waa laga saaraa iyadoo loo raro meelo fog. Sidaas darteed, in goofafka laga sameeyo xerooyin barakacyaal ayaa kaalin ka ciyaarta sara-u-kaca qiimaha dhulka ku yaal duleedka magaalada Muqdisho.

Bangiyada ganacsiga waxay lacago amah ah siiyaan shakhsiyaadka raba inay iibsadaan dhul. Tani waxay kordhineysaa awoodda qofku u leeyahay inuu iibsado dhul. Dadka ka ganacsado dhulka (oo sidoo kale loo yaqaan *Gaadleey*) ayaa faa'ido ka dhaliya amaahda. Waxay iibsadaan dhul iyagoo doonaya inay dib ugu iibiyaan qiimo ka badan. Bilo kadib (ama mararka qaarkood sannado kadib), milkiilayaashan waxay dhulkooda ku iibiyaan qiimo sare waxana ay dib ugu maalgeliyaan dhul kale. Nasiib darrose, dowladaha hoose ma fuliyaan sharciga mamnuucaya ka ganacsiyaga dhulka. Sida ku cad sharci lambar 10 ee 17-kii Diseembar 1980 (oo beddelay Sharciga Qaybinta Dhulka Magaalooyinka ee sanadkii 1973), dhulka *munishibaalaha* ah (oo ah dhul si kumeelgaar ah loo isticmaalo) waa in lagu dhisaa muddo hal sano gudaheed, halka sharcigu oggol yahay in dhulka *daminyaalaha* ah (oo ah dhul si joogto ah loo isticmaalo) lagu dhiso muddo laba sano gudahood ah (eeg qodobka 13-aad) (RVI & HIPS, 2017). In dowladda hoose ee gobolka Benaadir fuliso sharciga lambar 10 ayaa yarayn kara ka ganacsiga dhulka Muqdisho.

Waxaa jira dhowr goobood oo kale oo ay maalgashadeen ganacsato iyo kooxo kale kuwaasoo kordhiyey qiimaha dhulka ee gobolka Banaadir. Daarusalaam ayaa ah tusaalaha ugu weyn. Daarusalaam waa xaafad ku taalla cirifka fog ee degmada Yaaqshid waxaana maalgeliyay bangiga Salaam Somali Bank. Waxay leedahay guryo, dugsiyo, isbitaal, suuq, iyo adeegyo kale. Maalgashadeyaashu waxay sidoo kale dhiseen dhowr kiiloomitir oo wado laammi ah oo gasha xaafadda Daarusalaam si ay u sahlanaato isku socodka gaadidka iyo dadka. Qiimaha dhulka ku yaalla agagaaraha xaafadda Daarusalaam si degdeg ah ayuu u kordhay. Daarul Xadiis, oo 10 kiiloomitir u jirta bartamaha magaalada, waa tusaale kale. Koox diimeed ayaa halkaas ka aasaasay xaafad ay deggen yihiin, oo ay ka billaabeen waxbarasho diimeed. Qiimaha dhulka u dhow xaafadaas sare ayuu u kacay. Tusaale kale waa ganacsade dhul ka iibsaday Macaani oo halkaas ka dhisay masjid iyo jidad. Qiimaha dhulka ku yaalla aaggaas ayaa kordhay. Tusaale kale ayaa ah dhismaha Mubaax ee degmada Hodan, kaasoo kordhiyay qiimaha dhulku ku yaal agagaarka halka uu ku yaallo. Haddii ganacsade uu dhisme weyn ka dhiso xaafad, waxay sare u qaadeysaa qiimaha dhulka u dhow xaafadaas, maadaama ganacsato badan ay billaabayaan inay ka sameeyaan maalgashi kaa lamid ah isla xaafaddaas.

Dallaallada dhulka waa kuwo kaalin muhiim ah ku leh macaamillada dhulka ee gobolka Benaadir. Saameeyntoodu waxay si cad uga muuqata kireynta guryaha. Milkile guri ayaa sharraxay sida ay dallaallada dhulku gacan uga geysteen kordhinta qiimaha kirada: "marka la eego kirada, waxay mararka qaar saameeyaan milkiilaha dhulka iyagoo u sheegaya in ay keeni karaan qof lacag badan guriga ku kireysan kara taasoo ku riixeysa milkilahu inuu kireystaha deggan guriga ka saaro".

Kaalinta dowladda

Inta badan dadka la wareystay waxay isku raaceen in kaalinta dowladda (heer federaal iyo heer dowlad hoose) ee xakameynta beecmustarka dhulka ee Muqdisho uu yahay mid xaddidan. Waaxda Maamulka Dhulka ee Dowladda Hoose ee Muqdisho iyo sidoo kale nootaayooyinka ayaa kaalin ku leh arrimaha dhulka. Tusaale ahaan, nootaayooyinku waxay diiwaangeliyaan macaamilka iyo ku wareejinta waraaqaha lahaanshaha dhulka qofka dhulka iibsaday. Maamulka Gobolka Banaadir iyo Wasaaradda Maaliyaddu waxay ka qaadaan canshuurta looga baahan yahay in uu bixiyo iibsadaha dhulka.

Balse, taasi micnaheedu maahan in dowladda hoose iyo nootaayooyinkuba ay saameyn ku leeyihiin ka ganacsiga dhulka. Qiimaha dhulka waxaa saameeya heerka dalab iyo iska iibin ee suuqa. Haddii dowladda hoose ay hirgelin lahayd Sharci Lambar 10, ka ganacsiga dhulka waa la dhimi kari lahaa. Si kastaba ha noqotee, caqabadda ugu weyn ayaa ah in dawladdu aysan lahayn awood sharci oo ay wax uga qabato dhulka *goofka* ah. Tani waxay hoos u dhigeysaa kaalinta dowladda hoose ee wax-ka-qabashada dhulka *goof*-ka ah.

Saameynta ay ku yeelatay bulshada

Saboolka magaalada: mid ka mid ah saameynta qiimaha kirada ee Muqdisho oo sare u kacay ayaa ah barakicin dadban. Qaar kamid ah dadka saboolka ah ee aan awoodin inay iska bixiyaan lacagta kirada ayaa u guura xeryaha barakacayaasha (RVI & HIPS, 2017). Qoysaska hodanka ah iyo kuwa meel-dhexaadka ah ayaa ku bata xaafado qaar, iyadoo saboolka magaalada iyo kireystayaasha xaafadahan oo Muqdishu kamid ah ay raadiyaan goobo raqiis ah oo ku yaalla xaafadaha ku yaalla duleedka magaalada. Ma ahan guuritaan ay go'aansadeen, balse waa mid ka dhashay maalgashi lagu sameeyay xaafadaha qaar ee Muqdishu.

Sare-u-kaca qiimaha dhulka, gaar ahaan kirada, ayaa waxa ay sababtay in qoysas badan ay degaan goobaha ka baxsan magaalada. Wadada u dhaxeysa Muqdisho iyo Afgooye ayaa waxaa ku batay xerooyin ay ku nool yihiin barakacayaal iyo saboolkii magaalada. Gaadiidka shacabka ee ka shaqeeya xaafadaha Tabeelaha iyo Weedoow ayaa ah kuwo aad mashquul u ah, gaar ahaan subaxii iyo galabkii, sababtoo ah dadka deggan duleedka magaalada ayaa shaqo u yimaada subaxii magaalada iyagoo laabta qorrax-dhaca.

Sabool badan oo ka guuraya gudaha magaalada ayaa degaya goobaha ay kamid yihiin Garasbaalleey, Kaxda, Dayniile and Ceelasha Biyaha. Qaar ayaa dhul ka iibsada kadibna ka dhista guryo dhagax ah ama jiingado. Guryaha ay banneeyeen saboolkii magaalooyinka degganaa ama laga saaray barakacayaasha ayaa waxaa dega qoysas ladan iyo kuwa meel-dhexaad ah oo awooda in ay iska bixiyaan lacagta badan ee kirada guryaha magaalada.

Barakacayaasha: Muqdishu waxaa ku nool ku dhawaad 600,000

oo barakacayaal ah oo badankooda ku nool guryo aan rasmi ahayn (Internal Displacement Monitoring Centre, 2018). Kororka ku yimid qiimaha dhulka ee Muqdisho ayaa badiyay tirada barakacayaasha laga saaray goobihii ay ku noolaayeen ee ku yaalla Muqdishu. Maamulaha nootaayo ayaa sharraxay waxyaalaha sababa in barakacayaasha la saaro: "markii hore barakacayaasha ma ahayn kuwo deggan guryo kireysan. Milkiilaha guriga ay deganaayeen ayaa ka saarey ka dibna dhismaha kireystay maadaama uu sicirka dhulku sare-u-kacay." Dib-u-dhisidda magaalada iyo qorshaha dowladda ee ah in ay dib-u-dhisaan qaar badan oo kamid ah dhisamayaasha dowladda ayaa sababtay in qaxootigu u nuglaadaan in la saaro iyadoo aanu diyaarsaneyn qorshe dib-u-dejin.

Marka laga saaro xeryaha Muqdisho ku yaalla, barakacayaasha ayaa baadi-gooba dhul *goof* ah oo ku yaalla duleedka magaalada, kadibna waxa ay la heshiiyaan ninka leh *goofka*. Waxa ay bixiyaan lacag la yiraahdo *bowd-jebis*. Barakacayaasha ayaa laga yaabaa in dib looga saaro *goofka* kadib markii ay goobta noqoto meel deegaan ah, qiimaha dhulkana uu kordho, islamarkaana la geeyo qaar kamid ah adeegyada muhiimka ah sida biyo, suuqyo, iyo goobo caafimaad. Barakacayaasha ayaa iyagana dib usii baadi gooba oo dega *goofaf* kale oo ku yaalla goobo sii fog oo ay ku yar yihiin ama aanayba ka jirin adeegyada aasaasiga ah.

Barakacayaasha iy saboolka ay ku adag tahay in ay ku noolaadaan gudaha magaalada Muqdishu ayaa la tacaala sidii ay ku heli lahaayeen adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada. Tusaale ahaan, qof la wareystay ayaa sheegay in hooyo leh shan caruur ah ay kasoo guurtay degmada Howlwadaag una guurtay Dharkenleey sababo la xiriira kirada gurigii ay degganayd oo la kordhiyay. Degmada Howlwadaag, caruurteeda waxa ay dhiganayeen iskuul iyagoo heystay deeq waxbarasho oo ay bixiyeen deeqbixiyeyaal Carbeed. Caruurta waxa ay aadi waayeen iskuul sababtoo ah waxaa loo sheegay in caruurta ay lacag la'aan ku dhigan karaan keliya iskuulka Howlwadaag. Waxbarashada oo ku yar xaafadaha ku yaalla duleedka magaalada ayaa sababtay in qoysaska qaar ay bixiyaan kiro culeys ku ah si ay ugu noolaadaan xaafadahooda, caruurtoodana ay iskuulka u dhigtaan. Qaar badan waxa ay ku waayeen shaqadoodii kadib markii ay dageen goobo aad uga fog goobta shaqada. Waxa ay ku khasbanaadeen in ay bixiyaan kharashaadka gaari raaca oo aad u badan si ay shaqada u tagaan wakhtigii loogu talagalay, tan ayaana ah mid aanay joogtayn karin.

Talooyin tixgelin mudan

Si loola tacaalo sare-u-kaca qiimaha dhulka ee Muqdishu iyo saameynta taban ee uu ku leeyahay saboolka magaalada iyo qaxootiga, tallaabooyin dhowr ah ayaa la qaadi karaa.

Midda koowaad, amniga Muqdisho oo la hagaajiyo ayaa yareyn karta qiimaha dhulka iyo kirada guryaha oo hadda ku badan degmooyin iyo xaafado qaar. Qoysaska maalqabeenka ah iyo kuwa meel-dhexaadka ah ayaa waxa ay intooda badan deggan yihiin degmooyinka Muqdisho ee uu amnigoodu wanaagsan yahay. Haddii amniga magaalada, gaar ahaan degmooyinka ku yaalla geesaha la hormariyo, dad badan ayay u suurtagaleysaa in ay degaan degmooyinkaas. Tan ayaa yareyn doonto sare-u-kaca qiimaha kirada ee degmooyinka amni ahaan loo dego ee Muqdisho.

Midda labaad, in tirada badan ee barakacayaasha Muqdisho loo sameeyo dib-u-dejin ayaa iyana yareyn karta saameynta uu qiimaha dhulka ku leeyahay bulshada nugul ee danyarta ah. Waa in dib-u-dejin loo sameeyaa barakacayaasha ku nool buushashka aan ku habooneyn ee aadka u jilicsan, ama loo abuuraa fursado shaqo. Waxaa cashar laga baran karaa hannaanka dib-u-dejin ee Bosaaso iyo Hargeysa (Security on the Move, 2019). Madaxweynaha Turkiga ee Erdogan ayaa ballan-qaad ah in uu u dhisayo qoysaska saboolka ah 10,000 oo guri sameeyay safarkiisii labaad ee uu ku yimid Muqdishu bishii Janaayo 2015. Haddii si wanaagsan loo qorshayn lahaa loona dhisi lahaa, guryayntan waxa ay yareyn kari lahayd saameynta taban ee uu sare-u-kaca sicirka dhulka ku yeeshay bulshada danyarta ah ee Muqdisho ku nool. Siyaasad hagta habka loo wajahayo barakacayaasha oo waxtar leh iyo sidoo kale barnaamijyo sare u qaadis iyo dib-u-dejin ayaa hormarin kara barakacayaasha dhibaateysan, sida kuwa laga saaray goobihii ay degganaayeen sababo la xiriira qiimaha dhulka oo sare u kacay. Waxaa iyadana muhiim ah in la yareeyo barakaca cusub ee Muqdishu imaanayo iyadoo la hagaajinayo amniga iyo adeegyada bulshada ee aasaasiga ah ee gobollada deriska sida Shabeelldha Hoose iyo Shabeellada Dhexe.

Midda saddexaad, waa in dib-u-eegis lagu sameeyaa sharciyada dhulka. Dhulka ku yaalla magaalada bannaankeeda ee loo yaqaan *goof*-ka, ayaa waxaa beerta oo leh shakhsiyaad iyo beelo, dowladaha hoosena wax kaalin ah kuma laha maareynta *goofaf*-ka. Waa in dib-u-eegis lagu sameeyo islamarkaana dowladaha hoose la siiyaa awood ay ku maareeyaan *goofafka*. Wadashaqeyn wanaagsan oo u dhexeysa Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta iyo Maamulka Gobolka Benaadir ayaa waxa ay abuuri kartaa hannaan sharci oo lagu maareeyo dhulka goofka ah. Hirgelinta sharciyada haatan jira sida sharciga No.10 ee 17 Diseembar 1980 ayaa sidoo kale muhiim u ah si loo yareeyo ka ganacsiga dhulalka Muqdishu.

Midda afaraad, waaxyaha maamulka dhulka iyo qorsheynta magaalada ee Maamulka Gobolka Benaadir ayaa u baahan in la awood-siiyo si sare loogu qaado kaalinta ay ku leeyihiin qorsheynta iyo maamulka dhulka ee magaala Muqdisho.

Tixraac

Bakonyi, J., Chonka, P. & Stuvøy, K., 2019. War and city-making in Somalia: Property, power, and disposable lives. Political Geography, April.

DEMOGRAPHIA, 2019. Demographia World Urban Areas. April, p. 61.

Internal Displacement Monitoring Centre, 2018. City of Flight: New and secondary displacements in Mogadishu, Somalia. Thematic Series: Unsettlement: Urban displacement in the 21st century, November.

Rift Valley Institute & Heritage Institute for Policy Studies, 2017. Brief History of Land in Mogadishu. In: Land Matters in Mogadishu: Settlement, ownership, and displacement in a contested city.

Security on the Move, 2019a. Creating Satellite Towns: Displacement and Resettlement in Bosaaso. Research Brief w2, March.

Security on the Move, 2019b. Long-term legacies of displacement and urban growth in Hargeisa. Research Brief 4, March.

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS

***Mahadcelin**: Somali Public Agenda waxa ay u mahadcelineysaa Smart Institute for Training and Consultancy (SITCO) oo aan wada qabannay tababar ku saabsan cilmibaarista. Waxa aan sidoo kale u mahadcelineynaa Cabdinaasir Geedi, Mustafa Aaden, Cabduqaadir Maxamed, Maxamed Shariif, Jaamac Yuusuf, Axmed Carte, Shukri Axmed, iyo Masuud Axmed oo wareysiyada cilmibaaristan sameeyay.*